



STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES (WAAXDA
CARURTA, DHALINTA, IYO QOYSASKA)

1500 Jefferson Street, SE • P.O. Box 40975 • Olympia WA 98504-0975

ARCHIVED DOCUMENT. As of July 1, 2022, this document is no longer in force.

Juun 8, 2020

Warqad loogu talagalay Waalidiinta

Marka koowaad, ii oggoloow in aan adiga iyo qoyskaaga u rajeeyo nabad iyo caafimaad inta aad akhrinaysaan warqadaan. Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga iyo fahankaaga maadaama aniguna, aan sidaada oo kale aan la qabsanaynay, isbadelada waawayn ee nolasha intii lagu jiray bilahii ugu danbeeyay. Waxaan ka mahad celinaynaa rajada, dabacsanaanta iyo dulqaadka qoyska inta lagu jiray waqtiyadaas adag. Waxaan fahan sanahay ayadoo qaar adinka mid ah ay ka mahad celiyeen u wareejinta adeegyada hab maqal ah, hadana joojinta adeegyada shaqsiyaadka waxa ay ahayd wax aad u adag.

Ayadoo lagu saleenaayo saameynta muddada ah ee COVID-19 ku yeelanaayo Gobalka Washington, walaaca laga qabo caafimaadka iyo faya qabka caruurta iyo qoysaska helaaya adeegyada iyo shaqaalaha adeega siiya, Xaafiiska gobalka ee adeegyada taageerada siiya ilmaha yaryar iyo kuwa socod baradka ah (ESIT) ayaa go'aamiyay in la joojiyo adeegyada shaqsiyadeed, marka laga reebo xaalado gaar ah.

Waxaan maqalnay qaar badan oo idinka mid ah una wareegay adeegyada muuqaalka ah inay ku dageen kuna dareemeen dabacsanaan, helitaanka adeegyada iyo tababar wanaagsan oo ay bixiyaan adeeg bixiyaasha. Waxaa jira xog aruurino badan oo taageerada dhaqangalka adeegyada muuqaalka ah, qaabka isgaarsiinta adeegyadaan way siisoon doonaan waxayna sii ahaanayaan ikhtiyaari.

Hadaad tahay waalid go'aansaday inuu sugo helitaanka adeegyada illaa iyo inta shaqsi-shaqsi loogu geeynaayo, waxaan kugu dhiirigelinayaa inaad bal isku daydid adeegyada muuqaalka ah. *Waxaan dooneynaa inaan hubino in uusan lumin waqtigaan lagu jiro isbadelka degdega ah ee kobaca nolasha ilmahaaga.*

Waxaan sidoo kale ka warqabnaa in aan dhamaan baahiyaha aan lagu haqabtiri karin adeegyada aalada muuqaalka ah. Si loo maareeyo dhamaan baahiyaha shaqsiyadeed ee caruurta iyo qoysaska waxaan abuuraynaa nidaam waqtiga ugu habboon aqoon kara baahiya gaarka ah ee ilmaha ee ku salaysan adeegyada shaqsiyadeed kahor inta aan la gaarin habka caadiga ahaa ee adeegyada shaqsiga. Waxaan go'aan ka gaari doonaa halka lagu bixinaayo iyo tirada adeegyada la bixin doono anagoo xooga saarayna ammaanka ilmaha, waalidiinta, iyo shaqaalaha bixinaaya adeegyada. Haddii aad aaminsan tahay in ilmahaagu u baahan yahay adeegyadaas xaddidan ee loogu talagalay shaqsiyaadka, fadlan la xariir adeeg bixiyahaaga kala hadal waqtiga ku habboon iyo inay macquul tahay in la heli karo.

Si aad u taageerto soonoqoshada habka bixinta adeegyada ee shaqsiga, koox shaqo oo yar oo ay kamid yihiin labada adeeg bixiyeyaal iyo qoysaska, ayaa kulmaaya si ay ugu qorsheeyaan qorshe ESIT oo waafaqsan habka Badqabka ee uu soo jeediyay Gudoomiye Inslee.

Yoolalka kooxdaan shaqada waxaa kamid ah:

Warqad loogu talagalay Waalidiinta

Juun 8, 2020

Bogga 2

1. Soo saarista tillaabooyinka ay tahay inaan la sameen, ee u oggolaanaysa kooxaha yaryar ee wata dhalaanka iyo ilmaha socod baradka ah inay helaan baahiyaha degdega ah, oo ah inay muddo gaaban ku helaan taageero shaqsiyadeed.
2. Soo saarista qorshe dib loogu wareejinaayo adeegyada shaqsiyadeed ayadoo la isticmaalaayo qaab uu oggolyahay gobalku laguna dabaqaayo Qorshaha Badqabka ee uu soo saaray Gudoomiye Inslee.

Qorshaheena waxaa kujiri doona fariimo falcelin oo ay bixin doonaan adeeg bixiyeyaasha ESIT ee guud ahaan gobalka, waxaana muhiimada la saarayaa qoysaska.

Mar dhaw waxaan qaybin doonaa xog aruurin loogu talagalay qoysaska aana ku oggaan doono ikhradaha iyo caqabadaha qoysaska hela adeegyada ESIT inta lagu jiro waqtigaan aadka u adag.

Haddii aad qabtid su'aal, walaacyo, ama fikrado aad dooneyso inaad la wadaagto kooxda shaqada, fadlan nagala soo xariir laurie.thomas@dcyf.wa.gov.

Waan kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga inta aan arintaan ka shaqeenayno.

Mahadsanid,

Laurie Thomas

Maamulaha

Barnaamijka Taageerada waqtiga hore ee Dhalaanka iyo Caruurta socod baradka ah